
SOMALI

# Ogoow xog badan oo ku saabsan waxbarashada dheeraadka ah

**Waxbarashada qasabka ah inta lagu jiro iyo kadib waxbarashada aasaasiga ah**



ESPOO
ESBO




## Waa maxay macnaha waxbarashada qasabka ah?



Marka cunug ama kuray uu ku jiro da'da waxbarashada qasabka ah, waa in ay xaadiraan waxbarashada aasaasiga ah. Waxbarashada aasaasiga ah waxaa loola jeedaa fasalada 1–9 ee dugsiga hoose/dhexe. Intaas waxaa dheer, waa in ay ka qayb qaataan waxbarashada dheeraadka ah taas oo bilaabata kadib waxbarashada aasaasiga ah.

Waxbarashada qasabka ah waxa ay sida caadiga ah bilaabataa marka uu cunugu jirsado todobo sanadood. Tani waa marka uu cunugu bilaabo dugsi hoose/dhexe. Waxbarashada qasabka ah waxay dhamaataa marka uu cunugu gaaro da;da 18. Hase yeeshee, hadii qofka yarka ah dhamaysto u qalmitaanka dugsiga sare kahor da'da 18 waxbarashada qasabka ah waxa ay u dhamaataa waqtigaas.

U qalmida dugsiga sare waxaa loola jeedaa u qalmida uu ardaygu dhamaystay dugsiga sare (lukio) ama machadka xirfada (ammatillinen oppilaitos).

Marka uu cunugu ama qaan gaarku uu gaaro da'da waxbarashada qasabka ah, waxaa wax lagu baraa si bilaash ah. Tan macneheedu waxa ay tahay in Machadyada waxbarashadu ay waxbarashada iyo buugaagtaba ay ku bixiyaan si bilaash ah. Machadka waxbarashada waxay sidookale si bilaash ah ku bixiyaan waxyaabaha kale ee waxbarashada loogu baahan yahay.

Waxbarashada waa ku qasab caruurta iyo dadka dhalinyarada ah kuwaas oo sida joogtadaa u degan Finland. Waxbarashada qasabka ah waxaa lagu saleeyaa sharciga Finish-ka Xaaladaha qaar, waxaa dhici karta in, cunuga ama qofka yarka ah laga dhaafo waxbarashada aasaasiga ah. Sikastaba ha ahaatee, ka dhaafidu waa kaliya kumeel gaar waana kaliya sabab khaas ah. temporarily and only for a specific reason.

### Waxbarashada kadib waxbarashada aasaasiga ah

Dhamaan ardayda dhigata waxbarashada aasaasiga ah waa in ay codsadaan goob waxbarasho ka hor inta aysan dhamaan waxbarashada aasaasiga ah. Cutub hoosaadkani waxa uu sharaxayaa waxa ay yihiin Machadyada waxbarashada kala duwan. Kadib marka uu qofka yarka ah uu dhamaysto waxbarashadooda aasaasiga ah, waxa ay bilaabi karaan waxbarashadooda heerka dugsiga sare. Tan macneheedu waa qofka yarka ah waxa uu xaadiri karaa dugsiga sare ama machadka xirfada.

Intaas waxaa dheer, waxaa jirta waxbarasho la bixiyo kadib waxbarashada aasaasiga ah taas oo aan ku hogaaminayn digrii ama u qalmid. Tababarka noocaan ah waa, tusaale ahaan tababarla TUVA tusaale, tababarka u diyaarinta u qalmida. Hadafku waa kadib xaadirida tababarka TUVA in ardaygu uu codsan doono tababar ama waxbarsho ku hogaaminaysa digrii ama u qalmid.

Hadii uu qofka yarka ah uu u baahan yahay taageero khaas ah, waxa ay codsan karaan tababarka TELMA. Tababarka TELMA waxa ay dadka dhalinyarada ah u diyaarisaa shaqada iyo u noolaanshiyaha si madax banaan. Hadafka kadib tababarka TELMA ma aha in la sii wado tababarka ama waxbarasho ku hogaaminaysa u qalmid am digrii.

Dadka dhalinyarada ah waxa ay sidookale baran karaan dugsiga sare ee dadka waawayn. Waxa ay codsan karaan barnaamijyada logu talo galay dadka gaaray da'da waxbarashada qasabka ah.

Hagahaan waxa uu qeexayaa dhamaan doorashooyinka dhamaan tababaradaan. Sidookale waxay sharaxaysaa sida loo codsado waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waawayn. Soo gaabinta waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waawayn waa AIPE.

# Nidaamka codsiga wadajirka ah kadib waxbarashada aasaasiga ah

**1 Dib u milicso, sahmi qorsheena maxaa**

Ka aragtaa mustaqbalkaaga?

Sahmi fursado kala duwan oo waxbarasho dheeraad ah

**2 Codsho adoo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah**

Nidaamka codsiga wadajirka ah waxa uu qabsoomayaa Feebaraayo–Maarso. opintopolku.fi

Xusuusnoow lifaaqyada, hadii la codsado

Isku diiwaangeli kana qayb qaado imtixaanada gelitaanka/tijaabooyika xirfada, waraysiyada iyo qiimaynta xirfadaha luuqada. Hubi in aad bixiso lifaaqyada lagama maarmaanka ah.

**3 Fiiri natiijooyinka**

Natiijooyinka waxaa lasoo daabici doonaa dhexda-Juun waxaana laguugu soo diri doonaa iimayl.

**4 Waxaad heshay goob waxbarasho**

Aqbal goobtaada waxbarashada

Aqbar goobtaada sida ugu dhow uguna macquulsan Juun.

**4 Ma aadan helin goob waxbarasho**

Hadii aadan helin goob waxbarasho goob waxbarasho, si dhaqso ah ula xiriir lataliyahaaga hagida! Codso goob waxbarasho.

Goob waxbarasho waa la diyaarin karaa.

Liiska sugitaanku waxa uu shaqayn doonaa ilaa biloowga sanad dugsiyeedka.

**5 Bilow waxbarashadaada**

Sannad-dugsiyeedku wuxuu bilaabmayaa Agoosto

| Kahor mudada codsiga | Nidaamka codsiga wadajirka ah | Kadib mudada codsiga |
|---|---|---|

## Waa maxay nidaamka codsiga wadajirka ah?

Nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa loogu talo galay ardayda ay waxbarashadooda aasaasiga ah ay dhamaan rabto. Intaas waxaa dheer, nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa loogu talo galay ardayda wali xaadiraya tababarka TUVA ama TELMA. Nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa sidookale loogu talo galay ardayda ka barata barnaamijka waxbarashada dugsiga dadka waawayn ee da'da waxbarashada qasabka ah.

Nidaamka codsiga wadajirka ah, codsadayaashu waxa ay codsadaan waxbarashada dugsiga sare ama tababarka diyaarinta.

Nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa la diyaariyaa sanadkiiba mar, inta lagu gudo jiro Feebaraayo iyo Maarso. Waqtiyada kale, waxaa jira ogolaanshiyo aan xadidnayn, kaas oo aan eegi doono marka xigta.

### Waa maxay ogolaanshiyaha aan xadidnayn?

Waxaa jira goobo waxbarasho oo ay dadku codsan karaan ayaka oo u maraya ogolaanshiyaha aan xadidnayn. Ogolaanshiyaha aan xadidnayn waa mid furan dhamaan sanadka oo dhan. Dadka dhalinyarada ah waxa ay ka qayb qaadan karaan ogolaanshiyaha aan xadidnayn hadii aan loo ogolaan goob waxbarasho ayaka oo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah.

Codsadayaashu waxa ay ka qayb qaadan karaan ogolaanshiyaha aan xadidnayn marka ay, rabaan in ay goob waxbarasho u codsadaan, sabab kale owgeed uusana diyaar ahayn nidaamka codsiga wadajirka ah.

## Waxbarashada dugsiga sare

Barashada dugsiga sare ama machadka xirfada macneheedu waxa ay tahay xaadirida waxbarashada dugsiga sare. Waxbarashadaan waxa ay ku hogaamisaa u qalmid.

Marka xigta, hagahaan waxaa lagu eegi doonaa waxbarashada dugsiga sare iyo waxbarashada la xariirta.

### Barashada dugsiga sare

Dugsiga sare waa goob bixisa waxbarasho guud. Ardayda ugma qalinjabiyaan dugsiga sare xirfad u qalmid. Waxbarashada dugsiga sare waa mid dabiici ahaan in badan ku salaysan aragti marka loo eego waxbarashada xirfada.

Ardaydu waxa ay ku barataa dugsiga sare luuqado kala duwan iyo maadooyinka xisaabta. Intaas waxaa dheer waxay bartaan maadooyinka ku saabsan aadanaha iyo sayniska. Kuwaas waxaa ku jira diinta, anshaxa, cilmi nafsiga, falsafada, taariikhda, cilmiga bulshada, fiisigiska, kimistiriga, baayoolajiga, juquraafiga, iyo waxbarashada caafimaadka. Dugsiga sare, waxa ay ardaydu sidookale ku bartaan xirfadaha-iyo maadooyinka diirada saaraya-farshaxanka sida farshaxanka muuqaalka, muusikada iyo waxbarashada jimicsiga jirka. Waxaa sidookale waxbarashada ku jira la talinta ardayda.

Ardayda waxa ay sida caadiga ah xaadiraan dugsiga sare ilaa labo, sadex ama afar sanadood. Inta badan ardaydu waxa ay dugsiga sare ku dhameeyaan sadex sanadood.

Marka ay waxbarashada dugsiga sare ay dhamaan rabto, ardaydu waxa ay ka qayb qaadan karaan imtixaanka shahaadada Ardaydu waxaa in ay dhameeyaan imtixaanka ugu yaraan shan maado si ay ugu baasaan imtixaanka shahaadada Hadii ardaygu doonayo, waxa ay dhamayn karaan in ka badan shan maado-imtixaanada khaaska ah.

Imtixaanka shahaadada, imtixaanka luuqada Finish-ka waa waajib. Sidaas darteed ardaygu waa in uu dhameeyaa imtixaanka luuqada Finish-ka luuqada koobaad ama luuqada labaad midkay doonto ha ahaatee. Maadada waxaa lagu magacaabaa äidinkieli ja kirjallisuus (luuqada Finish-ka iyo suugaanta). Hadii ardaygu u barto Finish-ka sida luuqadooda koobaad, waa in ay imtixaanka

u dhameeyaan sida luuqada koobaad ee imtixaanka. Hadii ardaygu u barto Finish-ka sida luuqada labaad, waa in ay imtixaanka u dhameeyaan sida luuqada labaad ee imtixaanka.

Intaas waxaa dheer, ardaygu waa in uu dhameeyaa manhajka casriga ah ee xisaabta, luuqada labaad ee qaranka ama luuqada ajinabiga. Ardaygu waxa uu dooran karaa maadada ay tahay in uu qaato.

Marka uu ardaygu ku baaso imtixaanka shahaadada, waxa ay codsan karaan jaamacada ama jaamacada xirfadaha sare. Ardaygu waxa uu codsan karaa sidookale Machadyada xirfada.

Ardaydu waxa ay sidookale dhamayn karaan manhajka dugsiga sare ayada oon la qaadanayn imtixaanka shahaadada. Xaaladaas, sikastaba ha ahaatee, ma codsan karaan jaamacad. Waxa ay wali codsan karaan jaamacada xirfadaha sare ama waxbarashada xirfada iyo tababarka.

## Waa maxay digriiga IB?

Barnaamijka Dhibloomada ee International Baccalaureate (IB) waa imtixaanka shahaadada caalamiga ah. Barnaamijku waa Ingiriis. Digriiga IB waxaa laga dhamayn karaa in ka badan 150 wadan iyo in ka badan 5,000 goobo waxbarasho. Digriiga IB waxaa sidookale laga dhamayn karaa gudaha Finland. Gudha Finland, ardaydu waxa ay waxbarashada IB ku dhamaysaa sadex sanadood gudohood.

Marka uu ardaygu dhameeyo digriigooda IB waxa ay codsan karaan jaamacadaha kala duwan iyo jaamacadaha xirfada sare ee gudaha Finland iyo wadamada kale.

## Sida loo codsado dugsiga sare

Marka qofka yarka ah ee gaaray da'da waxbarashada qasabka ah uu dhameeyo dugsiga hoose/dhexe, waxa ay codsan karaan dugsi sare ee kasta oo kuyaala gudaha Finland.

Ardaydu waxa ay codsan karaan dugsiga sare ayaka oo u maraya nidaamka codsiga wada jirka ah ee la qabto inta lagu guda jiro gu'ga marka ay helaan warqada shahaadada



kabixida-dugsiga oo ka socota dugsiga hoose/dhexe ee gudaha Finland.

Waxaa jira 10 dugsiyo sare ee luuqada Finish-ka ah oo ku yaala gudaha Espoo. Dugsiyadaan sare waxaa ku jira labo dugsiyo sare kuwaas oo aad ka dhamaysan karto digriiga IB. Espoo waxa ay sidookale leedahay hal dugsi sare oo luuqada-Swedish-ka ah.

Hadii uu codsaduhu helo warqada shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota dugsiga hoose/dhexe ee ku yaal gudaha Finland, waxa ay codsan karaan dugsiga sare ayada oo lagu salaynayo shahaadada. Celceliska buundada ee maadoonyinka aragtida ku salaysan ee ku qoran warqada shahaadada kabixida dugsiga ayaa goaamisa hadii codsadaha loo ogolaanayo dugsi sare oo gaar ah. Maadooyinka aragtida ku salaysan waxaa ku jira kuwa soo socda: afka hooyo iyo suugaanta, luuqada labaad ee qaranka, luuqadaha ajinabiga, diinta ama anshaxa, taariikhda, cilmiga bulshada, xisaabta, fiisigiska, kimistiriga, baayoolajiga, waxbarashada caafimaadka iyo juquraafiga.

Dugsiyada sare ee kala duwan waxa ay leeyihiin tiro goobo waxbarasho oo kala duwan. Dugsi sare oo kasta isagaa si madax banaan u doorta tirada ardayda cusub ee uu qaadanayo. Tirada codsadayaasha iyo ceceliska buundadooda iyo dhibcaha ayaa ka qaybqaata hadii codsaduhu ka helayo ogolaanshiyo dugsi sare oo khaas ah. Tan sidookale waxa ay is bedbedeshaa sanadba sanadka xiga. Celceliska buundooyinka loo baahan yahay si lagaaga aqbalo dugsiga sare way ka duwan tahay sanadba sanadka xiga.

Gudaha Espoo iyo Aaga Bartamaha Helsinki , waxaa aad u baahantahay in aad ka haysato celceliska buundada ugu yaraan 7.0 maadooyinka ku salaysan aragtida si laagaga aqbalo dugsiga sare. Sikastaba ha ahaatee, dugsiyo sare oo badan waxa kali ah oo ay aqbalaan ardayda ay celceliska buundadoodu ka sarayso 7.0.

Waxaa sidookale jira dugsi sare oo khaas ah kaas oo ardaydu ku bartaan maadooyin gooni ah in ka badan dugsiyada sare ee kale. Qaar kamid ah dugsiyada sare sidookale waxa ay leeyihiin barnaamijyo kuwaas oo ardaydu bartaan maadooyin gooni ah in ka badan dugsiyada sare ee kale Hadii uu qofka yarka ah uu doonaayo in uu dugsi sare oo noocaas ah codsado, waa in ay codsigooda kusoo daraan lifaaqyo gooni ah ama ay qaataan imtixaanka gelitaanka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dugsiyada sare ee kala duwan waxaa laga heli karaa wabseedyada' dugsiyada sare iyo opintopolku.fi.

Qofka yarka ah wuu codsan karaa dugsi sare xataa hadii aysan haysan warqada shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota dugsiga hoose/dhexe ee ku yaal gudaha Finland Xaaladaan oo kale, dugsiga sare ayaa go'aansada kiiska ogolaanshiyaha- si khaas ah. Tan macneheedu waa **ogolaanshiyo ikhtiyaari ah**.

Marka uu dugsi sare isticmaalayo ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah, dugsiga sare waxa uu qiimeeyaa awooda la qabsi ee uu codsaduhu u leeyahay waxbarashada. Dugsiga sare waxa uu qiimeeyaa heerka aqooneed ee codsadaha iyo hadii uu codsaduhu uu si ku filan u yaqaan luuqada waxbaristа.

Si kastaba ha ahaatee waa wax aad u yar in dugsiga sare ogolaanshiyaha ardayda ku siiyo asaga oo u maraya ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah.

Dugsiga sare waxaa dhici karta in uu ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah u isticmaalo xaaladaha ay dhici karto in uu codsaduhu haystay manhaj shaqsiyadeed ah xisaabta iyo luuqada hooyo. Intaas waxaa dheer, dugsiga sare waxaa dhici karta in uu isticmaalo ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah hadii qofka yarka ah ee soo codsaday dugsiga ay ka hareen waxbarashadoodii aasaasiga ahayd ama aysan haysanba warqada shahaadada kabixida-dugsiga sabab kale oowgeed.

Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dugsiyada sare ee ku yaal gudaha Espoo waxaa laga heli karaa: [www.espoo.fi/en/specialised-schools-lines-and-weighted-curriculums](www.espoo.fi/en/specialised-schools-lines-and-weighted-curriculums)

## Dhamaystirka u qalmida dugsiga sare ee xirfada

Ardaydu waxa ay u qalmida dugsiga sare ee xirfada ku dhamaystaan Machadyada xirfada. Uqalmida dugsiga sare ee xirfada ayaa nolosha shaqada uga dhow marka la barbardhigo waxbarashada lagu dhameeyey dugsiyaalka sare. Uqalmida dugsiga sare ee xirfada macneheedu waxa ay tahay in uu ardaygu u qalmay heer caalami. Waxa ay sidookale siisaa awoodo aad u balaaran oo looga hawlgalo nolosha shaqada. Intaas waxaa dheer, xirfada u qalmida dugsiga sare waxa ay la timaadaa xirfado khaas ah oo kala duwan taas oo ku xiran doorashooyinka waxbarasho ee ardayga.

Waxaa jira dugsiyo badan oo kala duwan kuwaas oo ah u qalmitaano xirfad. Dugsiga sare ee u qalmida xirfada waxa ugu wayn uu ka koobanyahay **waa diyaarinta waxbarashada ee loogu talo galay u qalmida xirfada**. Intaas waxaa dheer u qalmida xirfada dugsiga sare waxaa kujira waxbarashada ay wadagaan dugsiyada sare ee u qalmida xirfada. Waxbarashadaas waxaa kamid ah, tusaale ahaan, luuqadaha iyo xisaabta.

Marka ardaygu dhameeyo xirfada u qalmida dugsiga sare, waxay wax kabartaan goobtooda waxbarashada iyo goobo shaqo oo kala duwan labadaba.

U qalmida xirfada dugsiga sare waxaa lagu dhameeyaa labo, sadex ama afar sanadood. Sida caadiga ah ardaydu waxa ay ku dhamaysaa u qalmitaankooda sadex sanadood

Ka dib marka ay ardaydu dhamaysataan u qalmidooda xirfada dugsiga sare, waxa ay codsan karaan Machadka waxbarashada jaamacada ama jaamacada xirfada sare.

Ardaydu waxa ay sidookale dhamaysan karaan waxbarashadooda dugsiga sare ayaka oo dhamaysanaya u qalmitaanadooda xirfada dugsiga sare. Xaaladaan waxbarsahada dugsiga sare waa qayb kamid ah u qalmida xirfada dugsiga sare. Ardaydu waxa ay sidookale dhamaysan karaan imtixaanada shahaadada ayaka oo dhamaysanaya u qalmitaankooda xirfada dugsiga sare.

Marka uu codsaduhu doonayo in uu dhamaysto u qalmida xirfada dugsiga sare, waxa ay ka codsan karaan goob xirfadeed oo kasta ee ku taala gudaha Finland. Marka la joogo Espoo, tababarka noocaan ah waxaa bixiya goob waxbarasho oo lagu magacaabo Omnia. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan **Omnia** waxaad ka heli kartaa halkan: www.omnia.fi.

Waxaa sidookale jira goobo xirfad oo khaas ah. Machadyada xirfada ee khaaska waxaa loogu talo galay ardayda la siin jiray taageerada khaaska ah marka ay joogeen dugsiga hoose/dhexe. Machadyadaan waxbarashada waxa ay taageero siiyaan ardayda u baahan taageero khaas ah oo heerkeedu sareeyo si ay u dhamaystaan u qalmitaankooda.

Marka la joogo Espoo, tababarka xirffada waxbarashada waxaa bixiya goob waxbarasho oo lagu magacaabo LIVE. Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa: www.livesaatio.fi/opisto

Wixii guud ahaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xirfada waxbarashada khaaska ah waxaa laga heli karaa: www.ameo.fi

Codsadayaashu waxa ay codsan karaan goob kasta oo xirfad khaas ah oo ku taala gudaha Finlad.

## Sida loo codsado goob xirfad

Hadii uu codsaduhu haysto warqada shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota dugsiga hoose/dhexe ee ku yaal gudaha Finland, waxa ay codsan karaan goob xirfad ayaka oo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah ee la diyaariyey gu'ga. Ardaydu waxa ay codsan karaan sidookale Machadyada xirfada ayaka oo u maraya nidaamka codsiga wada jirka ah ee la qabto inta lagu guda jiro gu'ga marka ay helaan warqada shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota dugsiga hoose/dhexe ee gudaha Finland.

Machadyada xirfada waxa ay xooga saaraan warqada shahaadada kabixida-dugsiga ogolaanshiyaha ardaygooda. Sidookale qaar ka mid ah Machadyada xirfada waxa ay diyaariyaan imatixaanka gelitaanka. Waxaa jira sidookale machadyo xirfad kuwaas oo ardayda ogolaanshiyo lagu siiyo kaliya ayadoo lagu salaynayo imtixaanada gelitaanka.

Codsadayaasha waxaa loo kala tixgeliyaa ayada oo loo eegayo warqada shahaadooyinka kabixida-dugsiga iyo suurtagalnimada imtixaanada gelitaanka. Qofka dhibcihiisa ayaa goaaminaya hadii laga aqbalayo machadka.

Hadii machadka waxbarashadu diyaariyo imtixaanka gelitaanka, codsaduhu waa in uu sameeyaa.

Hanaanka codsiga wadajirka ah waxaa dheer, codsaduhu waxa uu sidookale ka codsan karaa machadka xirfada asaga oo u maraya. Ogolaanshiyaha aan xadidnayn waa mid furan dhamaan sanadka oo dhan.

## Waa maxay tababarka shaqada?

Tababarka shaqadu waa qaab waxbarasho taas oo ardaygu ku dhameeyo waxbarashadooda u qalmitaanka xirfada dugsiga sare ayada oo lagu baranayo shaqada ayada oo loo marayo suaalaha shaqada. tababarka shaqada, waxa ay ardaydu ku dhamayn karaan u qalmida xirfada dugsiga sare ayada oo dhamaystiran ama kaliya kaybo kamid ah.

Hadii uu ardaygu rabo in uu bilaabo tababarka shaqada, waa in ay helaan shaqo ku haboon uqalmida xirfada khaaska ah ee dugsiga sare. Waa in ay sidookale la saxiixdaan heshiis machadkooda xirfada kaas oo khuseeya tababarka shaqada. Sidaas darteed heshiiska shaqada waxa uu leeyahay sedex qaybood: ardayga, shaqaalaysiiyaha iyo machadka xirfada.

Marka uu dhamaynayo shaqadooda tababarka shaqada, waa kuwo xiriir shaqaalanimo la leh goobtooda shaqada. Inta lagu gudo jiro tababarka shaqada, ardaygu waxaa haga kormeere jooga goobta shaqada. Sidookale waxaa lacag lagu siiyaa shaqadooda

Tababarka shaqada waxa uu ardayga siiyaa qibrad shaqo wuxuuna hormariyaa xirfadahooda caalamiga ah. Tababarka sidookale waxa ay ardayga fursad u siisaa in uu dhisto xiriiro caalami ah taas oo laga yaabo in ay mustaqbalkooda anfacdo.

Si kastaba ha ahaatee, waxyaabaha qaar laguma baran karo goobta shaqo barashada. Waxyaabahaan waxa ay ardaydu ku bartaan machad waxbarasho ama siyaabo kale.

Machadka xirfada iyo goobta shaqada ardayga ayaa masuul ka ah habka waxbarashada ardayga loo qorsheeyo, loo kormeero loona qiimeeyo.

Waxbarashadu waa u bilaash ardayga.

Marka uu ardaygu dhamaysto uqalmida xirfada dugsigooda sare ayada oo loo maraayo tababarka shaqada, waxa ay haystaan u qalmid u dhigmata ardayda dhamaysatay isla u qalmida xirfada dugsiga sare ayka oo baranaya machadka xirfada. Ardayda waxa ay sidookale codsan karaan goobta waxbarashada jaamacada xirfada sare ama jaamacada.

## Sida loo codsado tababarka shaqada

Codsadayaashu waxa ay codsankaraan tababarka shaqada sida ugu dhaqsiyaha badan kadib waxbarashada aasaasiga ah ama hadhoow.

La xariir xafiiskaaga shaqada ee gobolka si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u codsan karto tababarka shaqada.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tababarka shaqada waxa aad sidookale ka heli kartaa www.oppisopimus.fi.

Marka la joog Espoo, tababarka waxaa bixiya Omnia. Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xariir Xarunta Tababarka Shaqada Omnia barta www.omnia.fi/en/study-options/upper-secondary-vocational-qualifications/apprenticeship

# Tababarka u diyaarinta u qalmitaanka

Hagahaan waxa uu hada diirada saarayaa waxbarashada ka dib dugsiga hoose/dhexe taas oo aan ku hogaamin u qalmid. Waxbarashadaan waxa ay ardayga u diyaarisaa waxbarashada dugsiga sare. Intaas waxaa dheer, waxaa jira macluumaad ku saabsan waxbarashada aasaasiga ah oo loogu talo galay dadka waawayn.

## Waa maxay tababarka TUVA?

Tababarka TUVA waxaa loola jeedaa tababarka u diyaarinta waxbarashada ku hogaaminaysa u qalmida. Tababarka wuxuu socon doonaa ilaa hal sano. Tababarka TUVA u jeedkiisu waa in uu ardayda siiyaa awoodaha ay u baahanyihiin si ay u codsadaan goobaha waxbarashada dugsiga sare ama machadka xirfada ayna dhamaystaan waxbarashadooda.

Tababarla TUVA waxa ay ardaydu ku dhaqmi karaan waxyaabo ay ka midyihiin xirfadahooda luuqada Finish-ka. Intaas waxaa dheer, ardaydu waxa ay horumarin karaan buundooyinkooda ku qoran warqada shahaadooyinka kabixida-dugsiga oo ka socota waxbarashada aasaasiga ah. Waxa ay sidookale dhamaysan karaan waxbarashadooda dugsiga sare ama waxbarashada xirfada inta lagu gudo jiro tababarka. Ardayda waa kuwo la siiyo hagitaan inta lagu gudo jiro waxbarashadooda.

Qofka gaaray da'da waxbarashada qasabka ah waxa uu codsan karaa tababarka TUVA marka ay dhameeyaan waxbarashada aasaasiga ah. Sidookale waxa ay codsan karaan tababarka marka ay ka dhameeyaan wadan kale tababarka ama waxbarasho la jaan qaadi karta waxbarashada asaasiga ah ee Finlad. Xaaladaan, codsaduhu waa in uu haystaa shahaada tababarkaan ama waxbarashada.

Dadka jira 18 ama ka kor sidookale waa ay codsan karaan tababarka TUVA hadii aysan wali haysan u qalmida waxbarashada dugsiga sare.

Waxa aad codsan kartaa tababarka TUVA adoo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah ama ogolaanshiyaha aan xadidnayn.

Codsadayaashu waxa ay codsankaraan machad kasta oo waxbarasho kaas oo bixiya tababarka TUVA kuna yaala gudaha Finland.

Marka la joog Espoo, tababarka TUVA waxaa bixiya Omnia. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Omnia waxaad ka heli kartaa halkan: www.omnia.fi

Hadii uu ardaygu u baahan yahay taageero khaas ah oo heerkiisu sareeyo, tababarka TUVA waxaa bixiya LIVE. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan LIVE waxaad ka heli kartaa: www.livesaatio.fi/opisto/hakijalle/tuva

## Waa maxay tababarka TELMA?

Tababarka TELMA waxaa loola jeedaa u diyaarinta tababarida taas oo ardayda udiyaarisa shaqada iyo u noolaanshiyaha si madax banaan. Tababarka waxaa loogu talo galay ardayda ubaahan taageero heerkiisu sareeyo. Tababarka waxaa sida caadiga ah bixiya machadyo xirfad oo khaas ah.

Marka la joogo tababarka TELMA, ardaydu waxa ay bartaan xirfadaha ay u baahanyihiin maarka ay guriga joogaan iyo dugsiga, nolosha shaqada iyo bulshada dhexdeeda. Tababarku waxa uu socdaa ilaa 1–3 sanadood. Ujeedadu ma aha in la codsado waxbarasho kuu hogaaminaysa digrii ama u qalmid ka dib tababarka.

Waxa aad codsan kartaa tababarka TELMA adoo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah ama ogolaanshiyaha aan xadidnayn. Codsiga TELMA waa in ay ku jiraan lifaaqyo sharaxaya sababta qofka yarka ah uu u codsanayo tababarka TELMA.

Marka la joog Espoo, tababarka TELMA waxaa bixiya Machadyada LIVE. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan machadkaan waxbarashada waxaa laga heli karaa www.livesaatio.fi.

## Dadka ay da'doodu gaartay waxbarashada qasabka ah waxa ay sidookale xaadiri karaan dugsiga sare ee dadka waawayn

Dugsiga sare ee dadka waawayn waxa uu bixiyaa waxbarasho loogu talo galay dadka da'doodu gaartay waxbarashada qasabka ah. Waxbarashadaas waxa ay ku haboontahay dadka yaryar kuwaas oo dhamaystay waxbaarashada aasaasiga ah laakiin aan wali garanayn waxa ay rabaan in ay bartaan marka xigta.

Waxbarashada dugsiga dadka waawayn ee loogu talo galay ardayday da'doodu gaartay waxbarashada qasabka ah waxa ay socotaa hal sano. Waxbarashadaas waxaa loogu talo galay in ay awood siiso xirfadaha waxbarasho ee dadka yaryarka ah. Waxa ay sidookale ujeedadeedu tahay in ay awood siiso cadadka ay ka qaadan karaan waxbarashada dheeraadka ah dadka yaryarka ah. Intaas waxaa dheer, hadafku waa in ardayda la taageero marka ay qorshaynayaan noloshooda.

Dadku waxa ay codsankaraan dugsi sare kasta oo dadka waawayn oo ku yaala gudaha Finland. Waxa ay codsan karaan dugsiga sare ee dadka waawayn ayaka oo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah ama ogolaanshiyaha aan xadidnayn. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dugsiyada sare ee dadka waawayn waxa laga heli karaa www.kansanopistot.fi.



## Waa maxay AIPE?

AIPE waxaa loola jeedaa waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waawayn. Marka la joogo tababarka AIPE, ardaydu waxa ay dhamaysan karaan manhajka waxbarashada aasaasiga ah ee loogu talogalay waxayna heli karaan helaan warqada shahaadada kabixida-dugsiga taas oo katimid waxbarashada aasaasiga ah. Ardaydu si ay horumar oga sameeyaan xirfadaha waxbarashada iyo luuqaada waxa ay u baahan doonaan waxbarasho dugsi sare.

Codsadayaasha waxa ay codsankaraan tababarka AIPE hadii ay san dhamaysan waxbarashada aasaasiga ah.

Tan sababteeda waxaa laga yaabaa, tusaale ahaan, in codsaduhu usoo guuro Finland dhamaadka dugsiga hoose/dhexe. Codsadayaashu waxa ay codsankaraan tababarka AIPE xaaladaha aan gabi ahaanba loo ogolayn in ay xaadiraan waxbarashada aasaasiga ah ee loogu talo galay caruurta iyo dadka yaryarka ah.

Xuquuqda ah in la xaadiro waxbarashada aasaasiga ah e luugu talo galay caruurta iyo dadka yaryarka ah waxa ay dhamaataa dhamaadka sanad dugsiyeedka gu'ga marka uu qofku gaaro 17 sano jir.

Ka hor inta uusan ardaygu bilaabin waxbarashadooda AIPE xaaladooda biloowga ah waxaa lagu qiimeeyaa wada shaqaynta ay la leeyihiin ardayda. Ujeedada laga leeyahay qiimaynta waa in la go'aansho nooca ay tahay waxbarashada uu ardaygu u baahan yahay, heerka waxbarashada ay dhamaynayaan iyo waxa uu hadafkoodu yahay. Intaas waxaa dheer, qiimaynta biloowga waxa ay tijaabinaysaa sida uu ardaygu uga guul gaari karo hadafyadaas. Sidookale ardayga waxa uu diyaarin doonaa qorshe waxbarasho shaqsiyadeed.

Waxbarashada aasaasiga ah ee loogu talo galay waxa ay ka koobantahay sadex heer. Kuwaas oo ah heerka waxbarashada akhri-qoraaleedka, heerka waxbarashada biloowga ah iyo heerka waxbarashada ugu danbeeya.

Inta lagu gudo jiro heerka akhris-qoraaleedka, ardaydu waxa ay bartaan sida loogu akhriyo looguna qoro Finish-ka.

Heerka waxbarashada biloowga ah waxa ay u dhigantaa maadooyinka lagu barto fasalada 1-6 ee waxbarashada aasaasiga ah. Hadii uusan ardaygu garanayn sida loo aqriyo ama loo qoro ama ay ka maqantahay xirfadooda fahanka kuwaas, ardayga waxaa sidookale tababar lagusiin doonaa inta lagu gudo jiro heer waxbarashada biloowga ah. Heerka waxbarashada biloowga ah waxay qaadataa ilaa 1.5 –3 sanadood in la dhameeyo.

Heerka waxbarashada ugu danbeeya waxa ay u dhigantaa maadooyinka lagu barto fasalada 7–9 ee waxbarashada aasaasiga ah. Heerka waxbarashada ugu danbeeya waxa uu qaataa ilaa 1–2 sanadood. Waqtiga ay qaadato waxbarashadaan way kala duwantahay ayada oo lagu salaynaayo waxa uu ardaygu horay usoo bartay.

Codsiga tababarka AIPE waxa uu furunyahay 3–5 jeer sanadka. Codsadayaashu waxa ay codsan karaan machadkasta kasta oo xirfada waxbarashada kaas oo bixiya tababarka AIPE gudaha Finland. Foomka codsiga waxaa sida caadiga laga heli karaa wabseedka machadka waxbarashada.

Marka la joogo Espoo, tababarka AIPE waxaa bixiya Omnia. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tababarka AIPE Omnia waxaa laga heli karaa halkaan: www.omnia.fi/en/educations/basic-adult-education

## Sida uu u shaqeeyo nidaamka codsiga wadajirka ah

Marka uu codsaduhu rabo in uu codsado dugsiga asaga oo u maraya nidaamka codsiga wadajirka ah, waa in ay buuxiyaan foomka codsiga. foomka waa in lagu buuxiyo Finish ama Swedish.

Foomka waxaa lagu soo gudbiyaa si elegtaroonik ah. Waxaad ka heli kartaa www.te-palvelut.fi.

Isla goobta sidookale waxa ay leedahay foomka barbarashada, kaas oo u ogolaanaya codsaduhu in uu ku ceceliyo buuxinta foomka si horu dhac ah. Waxaa macquul ah in la isticmaalo foomka barbarashada dhawr bilood ka hor waqtiga codsiga loogu talo galay in uu biloowdo nidaamka codsiga wadajirka ah.

Machadyada waxbarashada qaar waxay sidookale waydiiyaan codsadayaasha macluumaad kale oo la xariira codsiga.

Waa in aad si horudhac ah usii bartaa nafsadaada doorashooyinka iyo tabobarada kaladuwan. Codsadayaashu waa in ay sidookale ay wax ka waydiiyaan qorshohooda lataliyaha hagitaanka.

Nidaamka codsiga wadajirka ah, waxaa aad codsan kartaa ilaa doorashooyin ka kooban ilaa todobo tababar. Waa fikir fiican in la codsado doorashooyinka tababarada xiisaha leh tiradooduna badantahay sida ugug macquulsan.

Tababarka uu codsaduhu badanaa doorbidayo waa in loo asteeyaa doorashada muhiimada koobaad leh. Codsadahay waxaa laga aqbalayaa in tababarkiisa qaataan kuwa ay ka keenen dhibcaha ku filan ama celceliska buundada (shahaadada ka bixida-dugsiga).

Codsadaha waxaa tababarka laga siin doonaa goobta ay ka haystaan dhibcaha ugu sareeya ee ku filan ama celceliska buundada ahna midka ugu sareeya ee ay doorbidayaan. Markaas, goobaha kale ee uu codsaduhu codsaday waxay noqdaan kuwo iskood u joogsada.

Si kastaba ha ahaatee, hadii aan codsadaha loo dooran tababarka ay doonayeen, waxaa wali lagu dari karaa liiska sugashada. Markaan, codsaduhu waxa uu sugi doonaa goob waxbarasho. Codsaduhu waxa uu ku jiri karaa liiska sugashada dhamaan doorashooyinka tababarka aan loo dooran. Si kastaba ha ahaatee, codsaduhu waa in uu yahay mid u qalma in uu xaadiro doorashooyinka tababaradaan. Tan macneheedu waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku xiran tababarka.

Hadii uusan codsaduhu helin halmid oo kamid ah doorashooyinka goobta waxbarashada, waxa ay ahaan doonaan goob waxbarasho la'aan. Xaaladaas, waxaa wali ku waajib ah in ay codsadaan tababarka.

Dhamaan macluumaadka ku saabsan machadyada waxbarashada Finland waxaa laga heli karaa www.opintopolku.fi. Waxaa sidookale jira macluumaad ku saabsan waxyaabaha saameeya codsiga.

Hadii codsaduhu helay shahaado kabixid-dugsi uu ka helo dibada, waxa ay codsan karaan tababar ayaka oo u maraya ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah kaas oo uu ku jiro nidaamka codsiga wadajirka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tan waxaa lagu bixiyey cutub hoosaadka xiga.

Codsadayaashu waxa ay sidookale ka codsankaraan tababarka ayaka oo u maraya ogolaanshiyaha aan xadidnayn.

### Waa maxay ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah oo uu ku jiro nidaamka codsiga wadajirka ah?

Dugsiyada sare iyo machadyada xirfada waxa ay aqbali karaan ardayda ayaka oo u maraya ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah. Xaaladaas, dugsiga sare ama machadka xirfada waxa ay samayn doonaan doorashada ardayga si aysan u tixgelin dibcaha codsadaha ama ay u tixgeliyaan qayb kamid ah.

Majiro wax ogolaanshiyo ikhtiyaari ah oo loogu talo galay tababarka TUVA, tababarka TELMA, ama waxbarashada dugsiga sare ee dadka waawayn ama waxbarashada xirfada ee la siiyo ardayda u baahan taageerada khaaska ah ee heerkeedu sareeyo.

Majiro ogolaanshiyo ikhtiyaari ah oo loogu talo galay barnaamijyada kaliya ee ogolaada ardayda lagu saleeyey imtixaanaadka gelitaanka ama tijaabooyinka xirfada.

Ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah waxaa loo isticmaali karaa sababo kala duwan. Hadii uu codsaduhu codsanayo machad xirfad, sababahaas waxaa ku jira

- caqabadaha barashada iyo sababo bulsho
- waxbarashada oo dibada lagu soo dhamaystay
- manhaj shaqsiyadeed lagu diyaariyey afka hooyo iyo xisaab.

Ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah waxaa sidookale loo isticmaali karaa marka aysan xirfadaha luuqada ee codsaduhu ku filnayn in uu dhameeyo digree ama u qalmid. Intaas waxaa dheer, ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah waxaa la isticmaalaa marka codsaduhu uu ka tago wax barashadiisa aasaasigaa uusana haysana shahaadada katagida-dugsiga.

Hadii uu codsaduhu uu codsanayo dugsiga sare, ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah waxaa loo isticmaali karaa sababaha soo socda:

- in codsaduhu uu ka tago wax barashadiisa aasaasigaa uusana haysana shahaadada katagida-dugsiga.
- in codsaduhu uu ku dhameeyey waxbarashadiisa ama tababarkiisa dibada
- in codsaduhu leeyahay manhaj shaqsiyadeed lagu diyaariyey afka hooyo iyo xisaab.



## Sida looga codsado ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah

Maarka codsaduhu ka codsado goob waxbarasho ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah, tan waa in lagu qeexaa foomka codsiga ay u isticmaalaan nidaamka codsiga wadajirka ah goob kasta oo waxbarasho oo ay ka codsadaan ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah.

Codsaduhu waa in uu sidookale u diraa machadka waxbarashada kaas oo ay codsanayaan dhamaan lifaaqyada ku salaysan ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah.

Hadii codsaduhu ku dhameeyey manhaj shaqsiyadeed lagu diyaariyey afka hooyo iyo xisaab.dugsiga hoose/dhexe, waxay si iskood ah ugu jiraan ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah. Xaaladaan, codsaduhu kuma jiro ogolaanshiyaha ku salaysan dhibcaha.

Nidaamka codsiga wadajirka ah, codsadayaashu waxa ay ku codsan karaan shahaado tababar ama waxbarasho oo lagu soo dhameeyey dibada, hadii aysan haysan shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota waxbarashada aasaasiga ah ee Finish-ka.

Codsadayaasha haysta shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota dugsiga hoose/dhexe ee Finish-ka ama ku jira haananka helitaanka midkaas kuma codsan karo shahaado lagu soo dhameeyey dibada.

## Sida loogu qeexo ogolaanshiyaha ikhtiyaariga foomka nidaamka codsiga wadajirka ah

Foomka nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa ku jira qayb "Waxbarashadaada aasaasiga ah" (Pohjakoulutuksesi),

Hadii uusan codsaduhu haysan shahaadada kabixida-dugsiga, u calaamadi qaybtaan "Ma jirto shahaadada kabixida-dugsiga" (Ei päättötodistusta).

Hadii uu codsaduhu haysto shahaadada kabixida-dugsiga taas oo aan lala barbardhigi karin shahaadada kabixida-dugsiga oo ka socota waxbarashada aasaasiga ah eeFinish-ka, u calaamadi qaybtaan "Tababar ama waxbarsho lagu soo dhameeyey dibada"(Ulkomailla suoritettu koulutus).

Hadii uu codsaduhu leeyahay caqabado barasho, waxa ay u baahan yihii in codsiga ogolaanshiyaha ikhtiyaariga ah lagu soo daro bayaan ka yimid macalinka baahiyaha gaarka ah, dhaqtarka cilmi nafsiga ama dhaqtar.

Bayaan ama warbixin sidookale waa loo baahan yahay hadii codsaduhu uu leeyahay sababo kale oo ka hortaagan in uu horumar kasameeyo dugsiga. Sababtaas oo kale waxa ay la xariiri kartaa, tusaale ahaan, codsadaha noloshiisa ama caafimaadkiisa.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tilmaamaha codsiga iyo tababarka iyo doorashooyinka waxbarashada waxaa laga helikaraa wabseedyada machadyada waxbarashada kala duwan sidaas si lamid ah www.opintopolku.fi.

## Sida loo aqbalo goob waxbarasho

Natiijooyinka nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa lagu dhawaaqaa Juun dhexdeeda. Codsadaha waxaa natiijada nidaamka codsiga wada jira loogu soo diri doona iimayl: waxaa loogu soo diri doonaa ciwaanka iimaylka ay ku qoreen foomkooda codsiga. Soodiraha fariintu waxa uu noqon doonaa Opintopolku. Fariintu waxa ay qeexi doontaa goobta waxbarasho ee codsadaha la siiyey iyo goobaha waxbarasho ee ay kaga jiraan liiska sugitaanka.

Codsadaha waxaa kaloo loo soo diri doonaa fariin kale. Fariinta waxaa ku jiri doona tilmaamaha sida codsaduhu ay tahay in uu aqbalo goobta waxbarashada ee la siiyey iyaga. Fariintaan waxaa kaloo kujiri doona lifaaq kaas oo codsaduhu ka aqbali karo goobta waxbarashada.

Goobta waxbarashada waa in la aqbalaa dhexda Juun.

Machadyada waxbarashada ee suaalah waxa ay codsadaha u soo diri doonaan tilmaamo ay tahay in ay raacaan.

Marka codsaduhu aqbalo goobta waxbarashada, waxa ay wali ku jiri karaan liiska sugitaanka machadyo kale kuwaas oo ay mudnaanta koobaad ku siiyeen foomamkooda codsiga.

Natiijooyinka nidaamka codsiga wadajirka ah waxaa sidookale lagu soo daabici doonaa wabseedyada machadka waxbarashada. Si kastaba ha ahaatee, magaca codsadaha waxaa kali oo lasoo daabici doonaa hadii ay ogolaanshiyo ku bixiyeen foomkooda nidaamka codsiga wadajirka ah.

Waxbarashadu waxa ay bilaaban doontaa Agoosto. Qofka gaaray da'da waxbarashada qasabka ah waa in uu xaadiraa tababarka ama waxbarashada ay ka aqbaleen goobta waxbarashada.

Hadii codsadaha gaaray da'da waxbarashada qasabka ah uusan helin goob waxbarasho waa in uu sida ugu dhaqsiyaha badan ula xariiraa lataliyaha ardayga ee dugsigooda hoose/dhexe. Hadii uusan codsaduhu xaadirin dugsi hoose/ dhexe, waa in ay la xariiraan Ohjaamotalo. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Ohjaamotalo waxaad ka heli kartaa halkaan: www.espoo.fi/en/youth/ohjaamotalo

Hadii codsaduhu yahay wali mid yar, waxaa ka masuul ah qofka masuuliyadooda haya. Masuulku waa in uu hubiyaa in uu cunugoodu dhameeyo dugsi hoose/dhexe.

## Goobta waxbarashada ee lagu codsado nidaamka aan xadidnayn

Hadii uu codsaduhu uu goob waxbarasho ku codsaday nidaamka aan xadidnayn, waxaa loosoo diri doonaa fariin u sheegaysa hadii la siiyey goob waxbarasho. Codsadaha waxaa fariin kala duwan looga soo diri doonaa goob waxbarasho kasta oo ay codsadeen. Fariintu waxa ay sidookale qeexaysaa sida uu codsaduhu u aqbali karo goobta waxbarashada.

# Wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan Espoo

Lifaaqyadaan hoose waa kuwa aad ka heli karto wixii macluumaad dheeri ah oo ku saabsan tababarka iyo waxbarashada Espoo. Sidookale waxaa ka heli kartaa macluumaad ku saabsan sida loo codsado ama wax loo barto. Intaas waxaa dheer, lifaaqyadaan hoose waa adeegyada la siiyo dadka dhawaan usoo guuray Finland. Tusaale ahaan, City of Espoo waxa ay bixisaa adeegyadaan.

Waxbarashada dugsiga sare ee Espoo:
www.espoo.fi/en/specialised-schools-lines-and-weighted-curriculums

Tababarka iyo waxbarashada xirfada, tababarka TUVA, tababarka AIPE iyo tababarka:
www.omnia.fi/en

LIVE Vocational College in Espoo: www.livesaatio.fi/opisto

Macluumaad guud oo ku saabsan tilmaamaha xirfad khaas ah: ameo.fi/en/front-page/

Hagaha Magaallada Espoo: www.espoo.fi/en/information-about-joint-application-system

City of Espoo adeegyada loogu talo galay kuwa usoo guuray Finlad:
www.espoo.fi/en/city-and-decision-making/international-espoo/services-new-international-residents/hello-espoo-info

Taageerada loogu talo galay waxbarashada, qorshaynta shaqo xirfadeedka iyo raadinta shaqada:
www.espoo.fi/en/youth/ohjaamotalo

Macluumaadka ku saabsan nidaamka waxbarashada Finish-ka: www.infofinland.fi/fi/education

**Macalimiinta dhaqanka ee waxbarashada aasaasiga ah ee Finish-ka waxa ay sidookale bixin karaan cawimaad xaaladaha la xariira-dugsiyada luuqado kala duwan.** Xogaha xiriirkooda waxaa laga heli karaa halkaan www.espoo.fi/fi/suomenkielisen-perusopetuksen-yhteystiedot

City of Espoo, Finnish Basic Education
Multicultural Education Services, Meliora project